Waxaad ku khasbantahay in barnaamijka ka qaybqaadashada bulshada oo idil oo adiga laguu dajiyey aad raacatid. Wakhtigaasna waa in aad ballamada qofka xiriiriyaha uu kuu dhigay aad fulisaa.

Raacitaanka duruusta
Haddii jawaabta qoran oo laguu soo diraa ay tahay mid ah in la go'aamiyey in aad duruus dhigatid, **waxaad ku khasbantahay** in aad iskool (xarunta waxbarashada) iska soo qortid. Go'aanka laguu soo direy ayey ku qorantahay iskoolkii aad ka baranlahayd barnaamijkii adiga laguu dajiyey. Waxaad kaliya oo ka baaqankartaa duruusta haddii aad sabab macquul ah haysatid (sida kaba soo qaad jirro oo kale).
Markaasna waxaad ku khasbantahay in aad iskoolka iyo qofka ku hogaamiya ogaysiisid in aadan awoodin in aad timaadid. Iskoolka ka warayso qawaaniinta u taal markii aad rabtid in aad baaqatid.

Imtixaanka
Muddo sannad gudeheed ah marka laga billaabo ayaantii aad isa soo qortay ayaa labo imtixaan lagaa qaadayaa ku saabsan aqoontaada luqadda Hollandayska ('NT2') iyo aqoontaada dalka iyo bulshada Holland ('MO'). Imtixaamadan ma'aha kuwo ama lagu baasayo ama lagu dhacayo, ee waa kuwo lagu fiirinayo inta aad dalka, luqadda iyo bulshada ka taqaanid. Waxaa imtixaankaas lagu fiirinaya in aad ulajeedadii ugudambaynta ahayd oo lagaa rabey in aad qaartay iyo dariiqii waxbarasho oo aad mustaqbalka qaadi lahayd.

Wax sii barasho ama shaqo

Natiijada ka soo baxda imtixaamaadkii aad samaysay ayaa khamayntida iyo iskoolka iyo Xarunta Shaqada iyo Dhaqaalaha (CWI) ay isla fiirinayaan fursadaha aad leedahay ama jidadka kuu furan markii aad dhamaysid barnaamijkii adiga laguu dajiyey: sida kaba soo qaad waxbarasho, shaqo in aad raadsatid ama in aad hawlo bulshada dan u ah ama hawlo xannaanayn ah aad samaysid.
Talada taas ku saabsan waa lagaala sheekaysan doonaa.
Isla marka go'aanka lagaaro ah dariiqii aad mari lahayd, khamayntidu waxay ku khasbantahay in ay kugu taageerto habkii aad dariiqaas u raacan lahayd. Ulajeedadu waxa weeye in ugu badi muddo iix bilood ah marka lagabilaabo taariikhdii aad imtixaamaadka samaysay ka dib in aad dariiqaas raacatid.

Dhamaystirkii waajibaadka barnaamijka barashada ka qaybqaadashada bulshada

Markii aad dhamaysid barnaamijka barashada ka qaybqaadashada bulshada waxay khamayntidu kusiindoontaa shahaado ay ku qorantahay barnaamijka in aad raacatay, nooca u yahay iyo natiijada aad keentay. Halkaas ayayna ku dhamaadeen waajibaadkii kaa saarnaa ka qaybqaadashada bulshada.

Xaquuqaha iyo waajibaadka dadka dalka ku cusub oo la soo koobay

Xaquuqahaaga
Haddii aad tahay qof dalka ku cusub waxaad xaq u leedahay:
- barnaamij ah barashada ka qaybqaadashada bulshada oo asli ah
- in lagu hogaamiyo inta aad barnaamijkaas waddid
- in lagugu caawimo sidii aad dariiq labaad oo shaqo ama waxbarasho dambe u raacan lahayd markii aad barnaamijka dhamaysid
- in lagu siiyo shahaado caddaynaysa in aad laqabsatay bulshada markii aad barnaamijka dhamaysid.

Waajibaadkaaga
Haddii aad tahay qof dalka ku cusub waxaa waajib kugu ah:
- in aad iska soo qortid baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada
- in aad masaamaxaad warsatid haddii aadan (mudda gaaban) awoodin in aad timaadid baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada
- in aad timaadid baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada haddii lagaaga yeero
- in aad iska soo qortid xarun waxbarasho
- in aad ka qayb qaadatid duruusta luqadda Hollandayska, barashada dhexgalka bulshada iyo barashada fursadaha shaqooyinka ee jira
- in aad imtixaamaadka samaysid
- in aad ka faa'iidaysatid hogaaminta dambe ee lagu hogaaminayo
- in aad ka faa'iidaysatid caawimaada lagugu caawimayo in aad bulshada ka qayb qaadatid
- in aad ka faa'iidaysatid dariiqa waxbarasho ama shaqo oo lagugu hogaamiyo

Su'aalo

Wax su'aalo ah ma ka qabtaa warbixinta tan mise wax talo ah marabtaa, haka xishoon in aad timaadid Xafiiska Dadka Cusub (Bureau Nieuwkomers). Khamayntida ayaana ku siinaysa cinwaanka mashruucaas.

Colofon

uitgave
Ministerie van Binnenlandse Zaken en Koninkrijksrelaties
Ministerie van Onderwijs, Cultuur en Wetenschappen
Ministerie van Volksgezondheid, Welzijn en Sport
Ministerie van Sociale Zaken en Werkgelegenheid
i.s.m.
FORUM, Instituut voor Multiculturele Ontwikkeling
VluchtelingenWerk Nederland

redactie, productiebegeleiding en druk
Stimio Consultants Drukwerk & Design bv
basislayout
Aad Derwort
dtp & vormgeving
Stimio Consultants Drukwerk & Design bv i.s.m.
Dickhoff Design bv

taalversie
Somalisch, versie vreemdelingen

Aan de teksten van deze uitgave kunnen geen rechten worden ontleend.

Den Haag, november 2001

Één of meerdere exemplaren kunt u aanvragen bij
Stimio Consultants Drukwerk & Design bv
fax 0345 569825
e-mail post@stimio.nl

Ministerie van **Binnenlandse Zaken** *en* **Koninkrijksrelaties**

Wet inburgering nieuwkomers

Nolol cusub ee wadanka Nederland

Tababar ah ka qaybqaadasho bulshada oo loogu talagaley dadka cusub oo wadankan yimid 2001

Somalisch
tweede herziene versie
vreemdelingen

Ka qaybqaadasho bulshada

Si adiga oo ah qof wadanka ku cusub, loogu caawimo in aad wadanka degtid oo mustaqbal cusub ka dhisatid Holland, dawladdu waxay garatay in ay dadka wadanka ku cusub ay siiso barnaamij ah ka qaybqaadasho bulshada. Taas waxaa lagu sharciyeeyey qodobka ka qaybqaadashada bulshada ee dadka ku cusub wadanka oo af Hollandayska lagu yiraahdo Wet inburgering nieuwkomers oo marka lasoo gaabiyo noqonaya (WIN). Qodobkaasu wuxuu sharci noqday 30 bishii sagaalaad 1998. Munishiibiyada ama khamayntida ayaa go'aaminaysa in aad barnaamijkaas u baahantahay iyo inkale. Taas waxay ku ogaanaysaa iyada oo isticmaalaysa baaritaan ah ka qaybqaadashada bulshada. Sharcigu wuxuu qofwalba ku kalifayaa in uu isagu iska soo qoro baaritaankaas. Waxaad ku kala ogaankartaa in aad tahay qof larabo in uu isa soo qoro iyo inkale marka aad warqadatan akhrisatid. Waxaa kale oo warqadatan ku qoran meeshii aad iska soo qori lahayd, iyo waxyaabaha kale oo kugu waajibka ah. Haddii aad waajibaadkaas ka soo bixi waydid waxaa suurta gal ah in lacag ganaax ah lagaa qaado.

Ka qaybqaadasho bulshada oo lasoo koobey



Waa maxay sababta aad uga qaybqaadanaysaa bulshada?

Haddii aad rabtid in aad mustaqbal ka tabcatid wadanka Holland waxaa kama maarmaan ah in aad luqadda iyo bulshada wadanka si fiican u baratid. Waxbarasha kasta ama shaqo kasta oo aad u baahatid waxaa sharad lagaaga dhigayaa in aad aqoon u leedahay dalka iyo luqadda. Xitaa aqoontaasi nolol maalmeedkaaga ayey dan u tahay. Barnaamijka ka qaybqaadashada bulshada waxaad ka baranaysaa luqadda Hollandayska. Waxaa kale oo wax lagaa barayaa bulshada wadanka Holland iyo suuqa shaqada. Barnaamijka ka qayb-qaadashada bulshada waxaa inta badan la bixiyaa isku-jir ah NT2 iyo shaqo ama NT2 iyo waxbarasho tababar shaqo ah. Marka aad barnaamijkaas dhamaystirtid si fudud ayaad ula qabsan kartaa bulshada.

Sidee baad isaga soo qori kartaa baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada?

Waxaad **ku khasbantahay** in aad **adigu iska soo qortid** baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada haddii aad:

- sharci joogitaan oo muddo gaaban magan-galyo ahaan loo bixiyey (VBT magan-galyo) qaadatay
- sharci joogitaan oo muddo gaaban caadi ahaan loo bixiyey (VBT caadi) qaadatay
- jinsiyada waddanka Holland aad qaadatay, oo laakiin aadan Holland ku dhallan. Warqad warbixin ah oo gooni ah ayey leeyihiin kooxdaas ah dadka wadanka ku cusub.

Waxaad arrimahaas kore ku khasbantahay haddii aad lix iyo toban sano ka weyntahay oo ay tahay imaanshihii kuugu horey ee aad Holland ku timaadid oo aadna wakhti dheer deggenaanaysid.
Kuma Khasbanid in aad iska soo qortid baaritaankaas haddii aad leedahay jinsiyad ah waddan ka tirsan waddamada Yurub ee Midoobay (EU) ama waddamada ka tirsan Booska DhaqaalahaYurub (EER).

Haddii aadan (wakhti gaaban) awoodin in aad ballan la dhigato dadka qaabilsan baaritaanka ka qaybqaadshada bulshada - kaba soo qaad haddii aad jirantahay oo kale - waxaad codsan kartaa 'masaamaxaad'. Khamayntida ayaana go'aan ka gaaraysa in lagaa masaamaxo iyo inkale. Haddii lagaa saamaxo waxaa suurta gal ah in mudda gaaban lagaa saamaxo ama si rasmi ah lagaaga dhaafo. Haddii mudda gaaban lagaa saamaxo waa khasab ah in marka muddadaasi ay dhamaato aad iska soo xaadirisO khamayntida oo aad ka qayb qaadato baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada.

Iska qoritaanka iyo codsashada masaamaxaada baaritaanka waxaad adeegsan kartaa foomka iska soo qoritaanka iyo foomka codsiga masaamaxaada. Foomamkaas waxaa la qaybiyaa marka jawaabta lagu siiyo ah waddanka waad joogi kartaa ama markii aad iska soo qortid Qaybta qaabilsan Afaaraha Bulshada ee Khamayntida. Waa in aad foomka oo aad buuxisey u celisaa khamayntida:

- muddo lix wiig ah marka laga billaabo jawaabta lagu siiyo layiraaho VBT magan-galyo ama VBT caadi
- ama lix wiig marka laga billabo taariikhdii aad khamayntida iska soo qortay.

Habka foomka iska qoritaanka iyo foomka codsiga masaamaxaada loo buuxiyo iyo meeshii hadhow loo diri lahaa waxaad ka akhrisan kartaa warqadda warbixinta ee foomamka lasocota. Haddii aadan foomam helin, adigu waa in aad waydiisataa khamayntida.

Waa maxay baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada?

Waxaa baaritaanka ka qaybqaadashada bulshada lagu eeggayaa in aad u baahantahay in laguu diro barnaamij ah ka qaybqaadasho bulshada iyo inkale. Marka aad iska soo qortid ka dib waxaad heli doontaa warqad laguugu yeerayo waraysi lagu fiirinayo in aad luqadda Hollandayska in kugu filan aad ka taqaanid ama inkale iyo in aad bulshada Holland u warhaysid iyo inkale. Aqoontaada luqadda iyo xirfadahaaga waxbarasho ayaa la imtixaami doonaa. Waxaa kale oo baaritaankaas lagu fiirinayaa inta ay dhantahay tacliintaadu, shahaadooyinkaaga iyo khibradaada shaqadu inta ay dhantahay haddii aad hore u shaqaysay.
Waraysi dambe ayaa lagaala sheekaysanayaa natiijadii baaritaankaas. Haddii baaritaankaas ay ka soo baxdo in aad u baahantahay in aad raacatid barnaamij ah barasho ka qayb qaadashada bulshada, waxaa lagaala hadlayaa waxa larabo in aad baratid iyo ulajeedada kama dambaynta ah oo larabo in aad gaartid. Khamayntida waxaa suurta gal ah in ay iyadu barnaamijka dajiso. Waxaase muhiim ah in barnaamijku uu xaallada adiga kuu gaarka u qalmo, tusaale ahaan haddii aad shaqaysid ama aad shaqo raadinaysid. Sharcigan cusubi wuxuu khamayntiyaasha oo dhan ku khasbayaa in barnaamijka ka qaybqaadashada bulshada oo macquul ah ay dadka u dejiyaan.

Waxaadse ku khasbantahay in aad waraysiyaasha baaritaanka ka qaybqaadashada bulshda aad timaadid oo aad warbixin ka dhiibtid tacliintaada iyo khibrada aad u leedahay shaqo. Haddii aad jeceshahay waxaa laguu balaminayaa turjumaan.

Jawaabta:
Ma barnaamijka ka qaybqaadashada bulshada ayaad raacanaysaa mise wa lagaa (ama qaybo ka mid ah) saamaxayaa

Markii baaritaanku uu kuu dhamaado waxaa laguu soo dirayaa jawaab qoran oo ah go'aankii ay khamayntidu kaa gaartay. Go'aankaasi wuxuu noqonkaraa in aad ku khasbantahay in aad barnaamijka ka qaybqaadashada bulshada gashid iyo waxa uu barnaamijkaasu ka koobanyahay iyo natiijada adiga lagaa rabo in aad ka keentid barnaamijkaas. Go'aankaas waxaa lasocota warqad kuu fasiraysa waxa uu go'aanku yahay. Waxaa kale oo warqadaas ku qoran sidii aad yeeli lahayd haddii aad kasoo horjeedid barnaamijka adiga laguu dajiyey.

Haddii ay baaritaankaaga kasoo baxdo in aad qaybaha barashada bulshada qaarkood si fiican u taqaanid waa lagaa saamaxayaa qaybahaas oo barnaamijka adiga laguu dajiyey lagu dari maayo. Go'aanka aad khamayntida ka heshid waxaa lagu soo darayaa in lagaa saamaxay qaybahaas aad hore u soo baratay. Waxaa jira dadka qaarkood oo dalka iyo dhaqankiisaba iyo luqaddiisiba si fiican ula qabsaday oo barnaamijka ka qaybqaadashada bulshada oo dhan laga saamaxayo.

Barnaamijka barashada ka qaybqaadashada bulshada

Barnaamijka barashada ka qaybqaadashada bulshada oo buuxaa wuxu ka koobanyahay qaybahakan:

- duruuso luqadda Hollandayska ah oo loogu talagaley dadka aysan ahayn luqadoodii hooyo ama ay utahay luqad labaad (NT2)
- warbixin ku saabsan dalka Holland (barashada bulshada - MO)
- warbixin ku saabsan fursadaha shaqo oo kuu bannaan oo aad uga shaqaysan kartid dalka Holland (BO)
- imtixaan lagu soo xirayo
- hogaamin ah in lagu soo baro xaafadaddaada, dariskaaga iyo xafiisyada ay dani kaa gali karto oo dhan. Khamayntidu si ay arrintaas u fuliso qolo kale ayey u xilsaari doontaa, sida kaba soo qaad Ururka u midoobay in ay qaxootiga taageeraan (VluchtelingenWerk).
- gacan qabasho dheer oo ah sidii aad ula qabsan lahayd waxbarasho fiican ama shaqo.

Inta barnaamijka barashada ka qaybqaadashada bulshadu uu socdo oo dhan waxaa ku hogaaminaya qof xiriiriye ah. Qofkaas khamayntida ayuu matalayaa waxayna tahay shaqadiisu in uu horumarkaaga raaco. Qofkaas xiriiriyaha ah ayaadna ula tagi kartaa wixii su'aalo ah oo aad qabtid.